

Yeelo booqasho dareenle



Fiirinta Farshaxanka

XAGA CMA

Ma ka fikirtay waxa *farshaxanku arko*?

Hel shaqo farshaxan kana muuqo.

Fiiri sharshaxanka daqiiqad, ka dibna jeedso si dhabarkaagu ugu aado farshaxanka. Maxaad ka aragtaa gidaarka? Sideebaa farshaxanku u sharxayaa wuxuu arko maalinkasta? Ogow farshaxanada kale iyo ashyaada ku dhow midkan. Maxaad u maleysaa xidhiidhkoodu inuu noqonayo? Ma saxiibaa, cadowbaa, walaalaa, jaarbaa? Maxay ka hadlayaan markaanay wada joogin?

XAGA GURIGA

Raadi labo shay oo aad isleedahay iskumasoo baxayaan. Is garab dhig. Sheeko nooceee ah ayey sheegayaan? Maxaan dhacaya markaad mid kale ku dartid? Ka fikir inaad kala badeshid alaabaha—adoo shay dhigaya dusha ama hoosta, ama adoo is taabsiinaya ama kala fogeynaya. Sawir goobta aad u sameysid farshaxan ahaan, oo waxyar sii.





Ku Dhageysiga Farshaxanka

XAGA CMA

Hel farshaxan oo mala-awaal: Haddii farshaxankan sameyn lahaa cod, cod nooceee ah ayuu sameyn lahaa?

Waxaad maqli kari lahayd dabaysha iyo xayawaanka dhulka ama codka ku xeeran ee gudaha? Codad nooceee ah ayaad mala-awaashaa farshaxanka? Sideed isku maqashiin kartaa codadka aad mala-awaashay? Sideed u dhaqaajin kartaa gacmahaaga ama jidhkaaga si aad u matashid codadka aad mala-awaashay?

XAGA GURIGA

Hel warqad yar iyo waxaad ku sawirtid. Hel meel aad fadhiisan kartid kuna dhageysan kartid indhahaagoo xidhan. Adoon fiirin, ku calaamadi warqada codadka aad maqashay. Sideed u matali kartaa shinbir, caruur ciyaaraysa, ama codka dhismaha?

Dhadhaminta Farshaxanka...Lakiin maaha leefida Farshaxanka 😊

XAGA CMA


Farshaxano badan ayaa u muuqda cunto, sida farshaxanka ma noolaha, lakiin malo-awaakeena ayaa ka heli kara cuntada midabo, qaabab, iyo muuqaalo xataa marka farshaxanlayaashu aanay ugu talogalin.

Hel farshaxan aad mala-awaasho oo dhadhma macaan.

Miyuu noqon doonaa faarad, dareere, adayg, ama jilayc? Macaan, dhadhaan, ama milix? Maxaa kugu kalifay inaad tiraahdid sidaasi? Weelkee ayaad isticmaali lahayd, ama miyaad isticmaali lahayd gacmahaaga? Halkeed u maleynaysaa in cuntadan ka timid?

XAGA GURIGA

Marka xiga ee aad cuntid, yara deji oo ka fikir dhamaan qaabab dhamaan shantaada dareen ula dhaqmaan cuntada. Xidh indhahaaga oo mala-awaal midabada aad calalisid. Sideebaa isdejinta iyo ka fikirka qaababka dareenkaaga loo dhaaajihey intaad cunaysay wax badel aragtidaada?



Xaga hore: Severin Roesen, Wali Nool (faahfaahin), (Taariikh aan la garanayn). Saliida qafiska ku jirta. Lagu helay iyadoo loo marayo isku badal, Bequest of J. Willard Loos